

## Waa maxay sababta ilmahaygu ugu baahan doono shaybaadh maqal oo kale carruurnimada hore?

Dhammaan waayitaanka maqalka ee carruurnimada lagu ma ogaado wakhtiga dhalashada. Waayitaanka maqalku waxa uu iman karaa wakhti kasta sababo badan awgood.

Sababaha qaar oo ay tahay inaad u hubiso maqalka ilmahaaga:

- taariikh qoys oo ah waayitaan maqal oo joogto ah oo carruurnimada ah
- farqi la dareemi karo oo ah madaxa, wejiga, qoorta, ama dhegaha
- daawooyinka qaar oo la siiyey wakhtiga dhalashada wax ka badan 5 maalmood
- helitaan xanuun oo uu kamid yahay waayitaan maqal oo suuragal ah
- dhigitaan ah qaybta daryeelka xooggan ee dhallaanka cusub (NICU) wax ka badan 5 maalmood
- walaaca qoyska ama daryeelaha
- dib u dhac ku yimaadda horumarka hadalka iyo/ama luuqadda

VTEHDI ayaa waraaq kuu soo diri doonta adiga iyo daryeel bixiyaha ilmahaaga haddii lagu taliyo shaybaadho kale oo dheeraad ah.

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah ee ku saabsan liiska sare, iyo goorta iyo halka laga helayo ballan maqal, waxa aad booqataa **healthvermont.gov/hearing**.

## Barnaamijka Baadhista iyo Wax Ka Qabashada Maqalka ee Hore ee Vermont (VTEHDI)

Barnaamijka VTEHDI waxa uu dabagal ku sameeyaa natiijooyinka baadhista maqalka ee dhammaan carruurta ku dhalata Vermont si loo xaqiijiyo in dhammaan carruurtu ay galaangal u helaan baadhis iyo la socod maqal oo wakhtiga ku habboon oo munaasab ah.

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah, waxa aad booqataa
**healthvermont.gov/hearing**

Buug-yaraha:

- waxa loo turjumay oo lagaga heli karaa websaytkayaga Faransiis, Carabi, Sawaaxili, Burmiis, Kirundi, Neebali, Soomaali, Isbaanish
- waa la cusboonaysiiyey waxaana naqshaddiisa lala wadaagay shuraakooyinka qoyska (2022)

VERMONT
DEPARTMENT OF HEALTH

Qaybta Ogaanshaha iyo Wax Ka Qabashada Maqalka Hore ee Vermont ee Caafimaadka Hooyada iyo Ilmaha
1-800-537-0076 ama 1-802-651-1872
VTEHDI@vermont.gov

# Baadhista Maqalka Dhallaanka



MACLUUMAADKA QOYSASKA

Barnaamijka Ogaanshaha iyo Wax Ka Qabashada Maqalka ee Hore ee Vermont

Somali

## Waa maxay sababta DHAMMAAN dhallaanka loo baadho maqalkooda wakhtiga dhalashada?

- Maqalku waa wax aan la arki karin. Qoysasku waxa ay u maleeyaan inay awood u yeelan doonaan inay sheegaan in ilmahoodu aanu waxba maqli karin balse badanaa taasi ma dhacdo.
- 1–3 kamid ah kunkii ilmoodba waxa ay ku dhashaan waxoogaa xaddi dhego culays ah.
- Baadhista maqalka dhallaanka waxa lagu ogaan karaa waayitaanka maqalka ee suuragalka ah maalmaha u horreeya nolosha.
- Sanadka koowaad ee noloshu waxa uu muhiim u yahay horumarka hadalka iyo luuqadda. Marka dhawaqyada iyo codadka aan la maqli karin, waxa jiri kara dib u dhacyo.
- Kala badh carruurta waayitaanka maqalka wajahda waxa ay leeyihiin taariikh qoys oo la og yahay oo mashaakil dhanka maqalka ah ama qodobo khatar oo kale.

## Goorma ayaa uu ilmahaygu mari doonaa baadhis maqal?

Baadhis maqal waa in la bixiyo kahor inta aanad ka bixin isbitaalka. Isbitaallada badankoodu waxa ay baadhaan maqalka ilmaha kadib marka uu jiro da' ah 12-24 saacadood.

Haddii aad ku umusho guriga, umulisadaada ayaa baadhi doonta ilmahaaga toddobaaddada ugu horreeya ee noloshiisa.



## Yaa baadhi doona maqalka ilmahayga?

Baadhista maqalka waxa sameyn kara khabiir maqal, kalkaaliye caafimaad, farsamayaqaan la tababaray, khabiir daaweyn neefsasho, ama umuliso.

## Sidee loo baadhi doonaa maqalka ilmahayga?

Baadhitaanada maqalku waa kuwo ah ammaan, oo bilaa xanuun ah. Carruurta intooda badani waa ay seexdaan dhammaan wakhtiga maadaama oo aan wax jawaab-celin ah looga baahneyn ilmahaaga.

Shay yar ayaa la gelin doonaa dhegta ilmahaaga ama dhego gashiyo ayaa la saari doonaa dhegihiisa oo codad dabacsan ayaa la maqashiin doonaa. Qalabka ayaa waxa uu cabbiraa jawaab-celinnada, natiijooyinkuna waxa ay diyaar noqon doonaan makra baadhistu dhammaato.

## Waa maxay natiijooyinka macquulka ah ee kasoo bixi kara baadhista maqalka dhallaanka?

**GUDBID** waxa ay ka dhigan tahay wax tallaabo ah oo dheeraad ah looma baahna wakhtigan.

**TIXRAACID** waxa ay ka dhigan tahay ilmahaagu ma uu gudbin baadhistii dhegaysiga. Tani ma aha mid xaqiijinaysa waajitaan maqal, balse shaybaadh maqal la socosho ayaa loo baahan yahay.

**Aan Dhamaystirneyn/La Isku Dayey** waxa ay ka dhigan tahay in lagu qasbanaaday in baadhista la joojiyo xilli hore isla markaana midkale loo baahdo. Tani waxa ay ku iman kartaa heerka firfircoonida ilmaha, dhawaqa ka jira deegaanka ama mashaakil ku yimaadda qalabka.

Natiijooyinka Baadhista Maqalka ee ilmahaaga waxa lagu la wadaagi doonaa adiga, bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmahaaga iyo Barnaamijka VTEHDI.

## Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu aanu helin baadhis maqal ama u baahdo baadhis kale?

Barnaamijka VTEHDI ayaa kusoo wici doona adiga iyo/ama digtoorka ilmahaaga si uu kaaga caawiyo inaad ballan bukaan socod qabsato. Sidoo kale waxa aad la xidhiidhi kartaa VTEHDI (eeg macluumaadka xidhiidhka ee ku qoran halka dambe ee buug-yarahan).

Ballamaha bukaan socodka waxa laga qabsan karaa isbitaal bulsho, xafiis caafimaad maqal ama xafiis daryeel bixiye caafimaad carruureed.



### Waxa aanu adeegsanaa hannaanka 1-3-6*

**1** - Waxa aanu baadhnaa dhammaan maqalka dhallaanka kahor inta aanay ka bixin isbitaalka ama kahor da'da **1 bil** ah.

**3** - Carruurta u baahda shaybaadh kale waxa ay mari doonaan baadhis kahor **da'da 3 bilood** ah.

**6** - Carruurta laga helo xaddi ah dhego culays waxa loo gudbin doonaa oo laga diiwaangelin doonaa adeegyada wax ka qabashada hore ee gaarka ah kahor da'da **6 bilood** ah.

* *Iyada oo lagu salaynayo Tilmaamaha Maqalka Dhallaanka ee Guddiga Wadaaga ah (JCIH) ee qaranka.*

Somali